



Macaashka naafada

Miiska ku jira

Macaashka naafada	1
Yaa la siiyaa macaashka naafada ee Lambarka Bulshada?	2
Sidee ayaan u codsadaa macaashka naafada.	3
Goorma ayaan soo gudinayaa codsiga muxuuse yahay macluumaadka la iiga baahan yahay?	4
Yaa go'aan ka gaaraya in aan naafo ahay?	4
Sidee ayaan u gaarnaa go'aanka?	5
Maxaa dhacaya haddii codsigeyga la ogolaado?	6
Reerkeygu macaash ma qaadanayaan?	7
Sidee ayaa lacagaha kale e la bixiyo saameyn ugu yeelanayaan macaashka?	7
Maxaan La Iga doonayaa In Aan u Sheego Lambarka Bulshada?	7
Goorma Ayaan La ii Ogol yahay Medicare?	8
Maxaa la iga doonayaa in aan ka oagado shaqada?	8
Barnaamijka Dib Ugu Noqoshada Shaqada	8
La Xiriirka Lambarka Bulshada	9

Macaashka naafada

Naafanimada waa wax aanay jecleyn in ay dadka badankood ay ka fikiraan. Laakiin fursadaha in aad naafo noqoto waa mid qiyaastii ka badan inta aad maleyn karto. Waxa ay

daraasaduhu muujiyeen in qofka 20 jirka ah ee shaqeynaya uu 1 jeer 10kiiba uu fursad u leeyahay inuu noqdo naafo inta aanu gaarin da'da hawlagabka.

Buuggan waxa aad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan macaashka naafanimada ee Lambarka Bulshada laakiin looguma talo galin in looga jawaabo dhamaan su'aalaha. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan xaaladaada, waxa aad kala hawli kartaa wakiilka Lambarka Bulshada.

Macaashka naafada waxaa laga bixiyaa laba barnaamij; barnaamijka ceymiska naafada ee lambarka bulshada iyo barnaamijka Macaashka kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI). Buugan waxa uu ku saabsan yahay barnaamijka naafada ee Lambarka Bulshada. Macluumaad ku saabsan barnaamijka naafada ee SSI ee dadka waaweyn, ka akhri *Supplemental Security Income (SSI)* (Daabacaadda 05-11000-SO). Macluumaad ku saabsan barnaamijka naafada ee caruurta, tixraac *Benefits For Children With Disabilities* (Daabacaadda No. 05-10026-SO). Daabacadaheena waxa aad ka akhrisan kartaa www.socialsecurity.gov.

Yaa la siiyaa macaashka naafada ee Lambarka Bulshada?

Lambarka Bulshada waxa uu macaashka siiyaa dadka aan shaqeyn karin iyada oo ay ugu wacan tahay xaalad caafimaad oo la filayo in ay qaadato muddo sanad ka badan ama keento dhimasho. Sharcigga dawladda dhexe waxa uu si adag u qeexayaa naafanimada. Halka ay barnaamijyada qaarkood lacag siiyaan dadka qeyb ahaan naafada ah ama mudada gaaban naafada ah, Lambarka Bulshada sidaas ma yeesho.

Qaar ka tirsan xubnaha qoyska qofka shaqaalaha ee naafada ah ayaa sidoo kale lacag laga siiyaa Lambarka Bulshada. Arrintas waxaa lagu faahfaahiyey bogga 7.

Sidee ayaan uga soo baxaa shuruudaha macaashka naafada

Guud ahaan, si lagu siiyo macaashka naafada, waa in aad ka soo baxdaa laba shuruudood oo ku saabsan dakhliga:

1. Shuruudda “shaqada u dambeysay” waxa ay ku saleysan tahay inta da'daadu aheyd markii aad naafada noqotay; iyo
2. Shuruudda “mudada aad shaqeyneysay” taasoo muujineysa in aad shaqeysay muddo ku filan sida uu dhigayo sharciga Lambarka Bulshada.

Qaar ka mid ahmid dadka indhaha la'a waa in ay ka soo baxaaan shuruudda “mudada shaqada”.

Jaantuska hoose ayaa muujinaya sharciyada mudada loo baahan yahay in aad ka shaqeysay “shaqadii u dambeysay” taasoo ku sleysan inta da'daadu aheyd markii aad naafanimadu bilaabatay. Sharciyada jadwalkan waxa ay ku sleysn yihiin *Jadwal Rubucle* ah kaasoo ay da'daadu aheyd ama ay ahaan doonto.

Jawdalka rubuclaha ah waa:

Rubaca Koowaad: 1da Janaayo ilaa 31ka Maarso

Rubaca Labaad: 1da Abriil ilaa 30ka Juun

Rubaca Sadexaad: 1da Luulyo ilaa 30ka Siteembar

Rubaca Afraad: 1da Oktoobar ilaa 31ka Diseembar

Haddii aad naafo noqoto....	Waxa aad u baahan tahay:
Ka hor ama rubuca ay da'daadu ku buuxsameyso 24	Aad shaqaysay 1.5 sano oo shaqo ah ee muddo sadex sano ee ku dhamaata rubuca ay naafanimadaada bilaabatay.
Rubaca ay da'ddau gaarto 24 laakiin inta ka horeysa rubaca ay da'daadu noqoneyso 31	Shaqeeyey kala bar mudada ka bilaabat rubucii aad gaartay 21 oo ku dhamaanaya rubaca aad naafada noqotay. Tusaale: Haddii aad naafo noqtay rubaca ay da'daadu noqtay 27, waxa aad u baahan in aad shaqeyneysay sadex oo ka mid lixda sano ee ku dhamaata rubaca sanadka ee aad naafada noqotay.
Rubaca sanadka ee da'daadu 31 tahay ama ka dib.	Aad shaqaysay 1.5 sano oo shaqo ah ee muddo 10ka sano ee ku dhamaata rubuca ay naafanimadaada bilaabatay.

Jadwalka hoos ku qoran waa tusaale muujinaya shaqo intee le'eg ayaad u baahan tahay si aad uga soo baxdo shuruudda "mudada shaqada" haddii aad naafo noqoto da'a kala duwan oo la soo doortay. Shuruurdda "mudada shaqada" muhim ma aha in ay shaqadaadu ku dhacdo muddo go'an.

FIIRO GAAR AH: *Jadwalkan kama hadlayo xaaladaha oo dhan.*

Haddii aad naafo noqoto....	Waxa aad u baahan tahay:
Ka hor inta aadan gaarin da'da 28	1.5 Sano oo shaqo ah
Da'da 30	2 sano
Da'da 34	3 sano

Haddii aad naafo noqoto....	Waxa aad u baahan tahay:
Da'da 38	4 sano
Da'da 42	5 sano
Da'da 44	5.5 sano
Da'da 46	6 sano
Da'da 48	6.5 sano
Da'da 50	7 sano
Da'da 52	7.5 sano
Da'da 54	8 sano
Da'da 56	8.5 sano
Da'da 58	9 sano
Da'da 60	9.5 sano

Sidee ayaan u codsadaa macaashka naafada.

Laba siyaabood ayaad u codsan kartaa macaashka naafada. Waxa aad:

1. Ka codsan kartaabarta internetka www.socialsecurity.gov; or
2. Waxa soo wici kartaa lambarkayaga lacag la'aanta ah **1-800-772-1213**, si aad balan uga sameysato aad uga diiwaangeliso macaashka naafada xafiiska degaanka ama uu qof shaqaale ah telefoonka kaaga qaado macluumaadka. Wareysiga codsiyada naafada waxa uu qaataa qiyaastii hal saac. Haddii aad dhagaha la'dahay ama maqalku kugu adag yahay, waxa aad soo wici kartaa lambarka lacag la'aanta ah ee TTY, **1-800-325-0778**, inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo. Haddii aad balan smeysatay, waxa aan kuu soo direynaa tilmaamaha codsiga naafada oo kaa caawinaya in aad u diyaargarowdo wareysiga diiwaangelinta codsiga. Tilmaahaga bilowga codiga naafada waxa aad ka heli kartaa barta internetka ee www.socialsecurity.gov/disability.

Xaq waxa aad u leedahay in uu ku matalo qareen ama qof kale oo aad dooratay inuu ku matalo arrimaha la xiriira Lambarka

Bulshada. Macluumaad dheeraad ah waxa ad ka heli kartaa *Your Right To Representation* (Daabacaadda No. 05-10075-SO), kaasoo aad ka heli karto Lambarka Bulshada.

Goorma ayaan soo gudinayaa codsiga muxuuse yahay macluumaadka la iiga baahan yahay?

Waa in aad codsataa macaashka naafada sida ugu dhaqsaha badan marka aad naafo noqoto. **Codsiga macaashka naafanimada waxa ay qaadani kartaa sadex ilaa shan bilood.** Si aad u codsadata macaashka naafada, waxaa lagaa doonayaa in aad buuxiso codsiga macaashka naafada iyo Warbixinta Dadka Waaweyn ee Naafada Ah. Waxa aad codsigaaga ku soo gudbin kartaa barta internetka ee www.socialsecurity.gov. Waxaa suurogal ah in codsigaaga si degeg ah looga shaqeyn karo haddii aad nagu caawiso helitaanka macluumaadka kale ee aan u baahanahay.

Macluumaadka waxaa ka mid ah:

- Lambarkaaga Bulshada;
- Shahaadada dhalashada ama tan kaniisadda;
- Magacyada, cinwaanada iyo telefoonada dhakhtarka, shaqaalaha adeegga, isbitaalka, iyo bukaan socod eegtooyinka ku daaweeya iyo taariikhaha aad tagtay.
- Magacyada iyo inta ka qaadato daawooyinka aad qaadato.
- Diiwaanka caafimaadka ee dhakhtarkaaga, kuwa ku daaweeya, isbitaalada, bukaan socod eegtooyinka, iyo shaqaalaha adeegga ee aad heyso.
- Natijada sheybaarka iyo baaritaanada;
- Warbixin kooban halka aad ka soo shaqeysay iyo nooca shaqada aad qabatay; iyo
- Nuqul ka mid ah foomka W-2 (warbixinta mushaharka iyo canshuurta) ama, haddii aad iskaa u shaqeysato, canshuurta aad xareysay sanadkii la soo dhaafay.

Waxaa intaa dheer in aad lagaa doonayo in aad buuxiso foomam kale oo la codsiga macaashka naafada. Mid ka mid ah foomamka waxa lagu ururiyaa macluumaadka caafimaadka iyo sida uu saameyn ugu yeeshay shaqada. Foomamka kale waxa uu dhakhtarka, isbitaalada, iyo xirfadlayaasha kale ee ku daweeyey waxa aad u ogolaaneysaa fasax ay noogu soo diraan macluumaadka xaaladda caafimaadka.

Dib ha u dhigin codsiga macaashka haddii aadan heli karin macluumaadkaas si dhaqso ah. Waanu kaa caawineynaa sidii aad ku heli laheyd.

Yaa go'aan ka gaaraya in aan naafo ahay?

Waxaanu dib ugu noqneynaa codsigaaga si aan u xaqiijino in aad ka soo baxday shuruudaha aasaasiga ee codsiga macaashka naafada. Waxaanu hubineynaa in aad shaqeysay sanado kugu filan si aad xaq ugu yeelato. Sidoo kale, waxaanu qiimeyneynaa shaqada aad iminka qabato. Haddii aad ka soo baxdo shuruudahaas, waxaanu codsigaaga u direynaa Xafiiska Adeegga Caddeynta Naafanimada ee gobolkaaga.

Hay'adaas ayaa dhameytireysa go'aanka naafanimada ee aan gaareyno. Dhakhaatiirta iyo kuwa ku takhasusay naafanimada ee hay'adda gobolka ayaa weydiisanaya dhakhtarkaaga macluumaad ku saabsan xaaladaada. Waxa ay tixgelinayaan dhamaan xaqiigada dacwadaada. Waxa ay warbixinta dhakhtarkaaga, isbitaalada, bukaan socod eegtooyinka, iyo hay'adaha kale ee ku daaweeya u adeegsanayaan caddeyn muujineysa daaweyntaada. Waxa ay dhakhtarkaaga weydiinayaan

- Markii aad bilowday daaweynta;
- Markii aad bilowday daaweynta;
- Sidee ayaa xaaladaada caafimaadka u xadideysaa dhaqdhaqaaqaaga;
- Natijada sheybaarka caafimaadka; iyo
- Waa maxay daaweynta lagu sameeyey.

Waxaa kale oo ay dhakhaatiurta weydiinayaan macluumaad ku saabsan sida aad u qaban karto waxyaabo la xiriira shaqada sida socodka, fadhiga, qaadista, xambaaritaanka, iyo xusuusashada waxyaabaha lagu faro. Dhakhtarkaagu go'aan kama gaaro haddii aad naafanimadaada.

Shaqaalaha hay'adda ee gobolka ayaa laga yaabaa in ay u baahdaan macluumaadk dheeraad ah inta aanay go'aan ka gaarin naafanimada. Haddii aadan heli karin caddeymaha caafimaadka ee lagaa doonayo, waxa laga yaabaa in baaritaan caafimaad lagu diro. Waxaanu jecelnahay in aad aad aragto dhakhtarkaaga laakiin mararka qaarkood waxaa sameeya dhakhtar kale. Lambarka Bulshada bulshada ayaa bixinaya kharashka caafimaadka iyo qaar ka mid ah kharashka safarka ee la xiriira.

Sidee ayaan u gaarnaa go'aanka?

Waxaanu isticmaalaa nidaam ka kooban shan talaabo si aan go'aan uga gaarno in aad naafo tahay.

1. Ma shaqeyneysaa?

Haddii aad shaqeyneyso oo dakhliga ku soo gala uu ka badan yahay ilaa xad loogu talo galay, inta badan kuuma tixgelineyno in aad naafo tahay. Xadkaas waa mid isbedela snad kasta. Tiradii ugu damebysay ee sanadkakala soco *Update* (Daabacaadda No. 05-10003-SO).

Haddii aadan shaqyn, ama dakhliga ku soo gala uu celcelis ahaan le'eg yahay xadka loo geeyey ama ka yar yahay, hay'adda gobolku waxa ay eegeysaa xaaladaadda caafimaadka.

2. Xaaladaada caafimaadku ma tahay "mid aad daran"?

Si texgelin loo siiyo xaaladaada naafanimada iyada oo la eegayo sharciyada u degsan Lambarka Bulshada waa in ay noqotaa mid aad u daran oo kuu diideysa in aad qabsan karto waxyaabaha aasaasiga ah - sida aad wax kor u qaadi karto, istaagi karto, socon karto, fariisan karto ama

aad xasuusan karto - ugu yaraan muddo 12 bilood ah. Haddii aanay xaaladaadu sidaas u darneyn, laguuma tixgelinayo in aad naafo tahay. Haddii xaaladaadu aad u daran tahay, talaabada sadexaad ayaan u gudbeynaa.

3. Xanuunka ku haya ma yahay mid ka mid ah kuwa ku xusan liiska noo oqran?

Xaaladaha noo qoran (liiska) waa kuwa lagu tilmaamo xaalad caafimaad oo aad u daran qofkuna aanu awoodi karin inuu shaqeyn karo, iyada oo aan loo eegin da'diisa, waxbarashadiisa ama waayo aragnimada shaqada. Haddii xaaladaada (ama xaaladaha caafimaadka oo la isu geeyey) aanay ku qorneyn liiska, hay'adda gobolku waxa ay arkeysaa xaalad aad u daran oo liiskaba ku jirin. Haddii darnaashaha xaaladaada ay la mid tahay kuwa ku qoran liiska, hay'adda gobolku waxa ay go'aan ku gaareysaa in aad naafo tahay. Haddii aanay xaaladaadu waafaqsaneyn kuwa noo qoran, waxa ay hay'addu u gudbeysaa talaabada afraad.

4. Ma qaban kartaa hawshii aad horey u qaban jirtay?

Talaabadan, waxaanu go'aan ka gaarnaa haddii xaaladaadu tahay mid aadan qaban karin shaqooyinkii aad horey u qaban jirtay. Haddii aanay sidaas ahayn, go'aankenu waxa uu noqonayaa in aadan naafo aheyn. Haddii ay sidaas tahay, waxaanu u gudbeynaa talaabada shanaad.

5. Ma qaban kartaa noocyo kale oo shaqo ah?

Haddii aadan qaban karin shaqooyinkii aad horey u qaban jirtay, waxaanu eegeynaa haddii ay jiraan shaqooyin kale oo aad qaban karto. Waxa ay qiimeeyaan xaaladda caafimaadka, da'daada, waxbarashada, waayo aragnimada shaqadii hore iyo haddii ay jiraan wax xirfado ah oo aad leedahay oo aad shaqada u adeegsan karto. Haddii aadan qaban karin shaqo kale, waxaan kuu aqoonsaneynaa in aad naafo tahay. Haddii aanay sidaas ahayn, go'aankenu waxa uu noqonayaa in aadan naafo aheyn.

Sharciyo u gaar dadka indhaha la'a

Waxaa jira tiro shaciy ah ah oo gaara ah dadka indhaha la'a. Macluumaad dheeraad waxa aad ka heli kartaa *If You Are Blind Or Have Low Vision — How We Can Help* (Daabacaadda No. 05-10052).

Waxaanu ku wargelineynaa go'aankeena

Marka codsigaaga go'aan laga gaaro, waxaanu kuu soo direynaa waraaq. Haddii codsigaaga la ogolaado, warqadda waxaa laguugu sheegi doonaa inta uu noqonayo macaashkaaga iyo goorta uu kuu bilaabanayo. Haddii aan la ogolaan codsigaaga, warqadda ayaa laguugu sharxayaa sababta iyo sida aad racfaan uga qaadan karto haddii aadan nagu raacsaneyn go'aankeena.

Maxaa dhacaya haddii aynaan kugu diidanahay?

Haddii aad nagu diidam tahay go'aank aan ka gaarno codsigaaga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Talaabooyinka aad qaadeyso halkaan waxaa lagu faahfaahiyey *The Appeals Process* (Daabacaadda No. 05-10041-SO), oo aad ka heli karto Lambarka Bulshada.

Sidee ayaan kuula soo xiriireynaa

Inta badan waxa aan adeegsanaa boostada telefoon lagu soo diro marka aan dooneyno in aan kula soo xiriirno, laakiin mararka qaarkood wakiil ka tirsan Lambarka Bulshada ayaa laga yaabaa inuu yimaado gurigaaga. Wakiilka ka socda xafiiskeena waxa uu ku tusayaa aqoonsigiisa inta aanu kaalla hadlin macaashkaaga. Waxaa wanaagsan in aad la soo xiriirto xafiiska Lambarka Bulshada oo aad weydiiso haddii uu jiro qof lagu soo diray inuu kula kulmo.

Haddii aad indhaha la'dahay ama aragaagu fiicneyn, waxa aad dooran kartaa in lagu soo diro ogeysiiska xageena ka yimaada hababka soo socda.

- Warqad la daabacay oo laguugu soo direy boostada darajad koowaad;

- Warqad la daabacay oo laguugu soo direy boostada lana xaqiijiyo in ay ku soo gaartay;
- Warqad la daabacay oo laguugu soo direy boostada darajad koowaad iyo telefoon dabagal ah;
- Far xarfo la taaban karo ku qoran iyo daabacaad caadi oo laguugu soo diro darajada koowaad;
- Hab electaroonig ah oo laguugu shubay giraan (CD) iyo ogeysiis la daabacay oo laguugu soo diro boostada darajad koowaad.
- Giraan (CD) cod maqal ah lagu duubay iyo ogeysiis la daabacay oo laguugu soo diro boostada darajad koowaad.
- Ogeysiis lagu daabacay far daabacaad waaweyn (18 dhibcood) ogeysiis la daabacay oo laguugu soo diro boostada darajad koowaad.

Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa barta interka www.socialsecurity.gov/notices ama naga soo wici kartaa telefoonka lacag la'aanta ah **1-800-772-1213**. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka TTY, **1-800-325-0778**.

Maxaa dhacaya haddii codsigeyga la ogolaado?

Waxaan kuu soo direynaa waraaq aan kuu sheegeyno in codsigaaga la ogolaaday, lacagta macaashka ah ee bil kasta lagu siinayo iyo taariikhda ay ka bilaabaneysa. Macaashka naafada ee lagu siinayo bil kasta waxa uu ku saleysan yahay celicelis ahaan intii aad shaqeysay noloshada. Haddii codsigaaga la ogolaado, macaashka ugu horeeya ee naafada Lambarka Bulshada waxaa lagu siinayaan marka aybuuxsanto bisha lixaad laga soo bilaabo taariikhda aad noqotay naafada.

Tusaalahan ayaa arrintan faahfaahinaya: Haddii ay hay'adda gobolku go'aan ku gaarto in naafanimadaada bilaabatay 15kii Janaayo macaashka ugu horeeya waxaa lagu siinayaa bisha Luulyo. Macaashka Lambarka Bulshada

waxaa la bixiyaa bisha xigta bisha ay u buuxsanto, bisha Luulyo waxaa lagu sinayaa macaashka Agoosto.

Waxaa lagu soo dirayaa *What You Need To Know When You Get Disability Benefits* (Daabacaadda No. 05-10153), taasoo aad ka heleyso macluumaadka ku saabsan macaashka aa heleyso iyo isbedelka lagaa doonayo in aad soo sheegto.

Reerkeygu macaash ma qaadanayaan?

Waxaa laga yaabaa in qoyskaagu xaq u yeesho macaash ku saleysan shaqadaada. Waxa ay ka kooban yihiin:

- Xaaskaaga/seygaaga, Haddii uu isaga/iyadu da'diisu tahay 62 ama ka weyn ama;
- Xaaskaaga/seygaaga, da'da kasta oo uu jiro oo korinaya ilmo aad dhashay oo ka yar 16 sano ama naafo ah.
- Ilamahaaga aan guursan, oo ay ka mid yihiin, ilmaha aad korineyso, xaaladaha qaarkoodna, ilmo xaaskaagu dhalay ama aad awoowe u tahay. Ilmuhu waa inuu ka yar yahay 18 (ama ka yar yahay 19 oo waqtiga buuxa dhigto dugsi dhexe ama sare);
- Ilamahaaga aan guursan; 18 jir ama ka weyn, haddii uu isaga ama iyada naafo yahay oo bilaabatay inta aadan gaarin 22 sano. Naafanimada ilmaha waa in ay noqotaa mid ka soo baxda qeexitaanka naafada ee dadka waaweyn.

FIIRO GAAR AH: Xaaladaha qaarkood, qoyka kala tagay waxaa laga yaabaa in ay macaash xaq u yeeshaan ku saleysan dakhliga aad sameysay haddii aad wada joogteen ugu yaraan 10 sano, oo aanu guursan, da'diisuna tahay ugu yaraan 62 sano. lacagta la siiyo qofka aad kala tagteen ma yareyneyso macaashka aad qaadaneyso ama tan uu helayo qofka aad iminka wada joogtaan ama caruurta.

Sidee ayaa lacagaha kale e la bixiyo saameyn ugu yeelanayaan macaashka?

Haddii aad qaadaneyso macaash kale oo dawladeed (oo ay ka mid yihiin mid ka timaadda wadan ajnabi ah, waxaa laga yaabaa inuu saameyn ku yeesho macaashka naafada ee Lambarka Bulshada. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa kan soo socda.

- *How Workers' Compensation And Other Disability (Sidee Ayaa Ceymiska Dadka Shaqada Ka Dhamaato Iyo Lacagta Naafada Ay Saameyn Ugu Yeelan Karaan Macaashka Payments May Affect Your Benefits)* (Daabacaadda No. 05-10018);
- *Windfall Elimination Provision* (Daabacaadda No. 05-10045); iyo
- *Government Pension Offset* (Daabacaadda No. 05-10007).

Daabacaadahaan waxa aad ka heli kartaa boggeena internetka, ama waad naga codsan kartaa si aan kuugu soo dirno.

Maxaan La Iga doonayaa In Aan u Sheego Lambarka Bulshada?

Haddii maxkamad amarto in lagu soo xiro

Waajib bey kugu tahay in aad sheegto haddii maxkamad amarto in lagu xiro oo dambiyada culus ee oo socda mid ka mid ah aad gashay:

- Duulimaad si aad uga maxkamadeyn iyo heyn;
- In aad ka baxsatay xabsi; iyo
- Khatar u tahay in aad baxsato.

Ma qaadan kartid macaashka naafada, ama lacag hore oo kuu baaqatay bilihii hore ee lagu soo jaray xariga mid ka mid dambiyada culus.

Haddii lagugu helay fal dambiyeed

Markiiba la socodsii Lambarka Bulshada haddii lagugu helo fal dambiyeed. mucaashka naafada ee cadiga ah iyo lacagaha kale ee kuu baaqday

lama siinayo qofka lagu helay fal dambiyeed, laakiin haddii xubin kasta oo qoyska ka tirsan oo macaash xaq u laheyd kaasoo ku sleysan shaqada qofka macaashka waa u sii soconayaa.

Macaashka bil kasta ama lacaha kuu baaqday ee aan weli lagu siin inta badan lama siiyo qof geystay fal dambiyeed oo lagu xiray xabsi ay maxkamad amartay dadweynuhu kharashka bixiyey. Taas waxaa la mid ah haddii qofka lagu helay:

- Dambiga lagu waayey iyada oo loo tixgeliyey inuu qabo cudurada dhimirka ama waxyaabo la mid ah (sida cudurada dhimirka, ku dhashay maskaxdiisa oo aan dhameyn ama aanay maskaxdiisu dhameyn); ama
- Aan miyrkiisu dhameyn inuu ka qeyb galo dhageysiga maxkamadda.

Haddii aad jabiso shuruudaha xabsiga lagaaga sii daayey ama kor kala socoshada

Waxaa waajib kugu ah in aad noo sheegto haddii aad jabisay shuruudaha kala socoshada ama xabsi ka sii deynta sida ay dhigayaan sharciyada adwadda dhexe iyo gobol. Ma qaadan kartin macaashka bil kasta ama lacaha kuu baaqday ee aan weli lagu siin inta badan lama siiyo bil kasta oo aad jabisay shuruudaha kor kala socoshada iyo xabsi ka siideynta.

Goorma Ayaan La ii Ogol yahay Medicare?

Waxa aad xaq u leedahay ceymiska Medicare si toos ah marka aad qaadato macashka naafada muddo laba sano ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka *Medicare* (Daabacaadda No. 05-10043-SO).

Maxaa la iga doonayaa in aan ka oagado shaqada?

Ka dib marka aad qaadato macaashka Lambarka Bulshada, waxaa laga yaabaa in aad jecleysato in aad shaqeyso. Lambarka Bulshada waxa uu leeyahay xeerar gaar ah oo lagu

magacaabo oo kuu ogolaanaya in aad tijaabiso awoodda aad u leedahay shaqada oo weli aad qadato macaashka naafada ee Lambarka Bulshada. Waxa kale oo lagaa caawinayaa waxbashada, ka soo kabashada, iyo tababarada aad u baahan tahay si aad u shaqeyso.

Haddii aad shaqo hesho ama aad iskaa u shaqeysato, waxaa muhim ah in aad markiiba noo sheegto. Waxaan dooneynaa in aan ogaano marka aad shaqada bilowdo ama joojiso; ama uu jiro isbedel xaga shaqada ah, sacadaha shaqada ama lacagta lagu siiyo. Waxaa nagala soo xiriir kartaa telefoonka lacag la'aanta ah **1-800-772-1213**. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka TTY, **1-800-325-0778**.

Macluumaad ku saabsan caawinada aad heli karto si aad shaqada ugu noqoto, ka akhriso *Working While Disabled — How We Can Help* (Daabacaadda No. 05-10095-SO). Talo soo jeedin ku saabsan taageerada shaqada waxa aad ka heli kartaa buugeena *Red Book, A Summary Guide to Employment Support for Individuals with Disabilities Under the Social Security Disability Insurance and Supplemental Security Income Programs* (Buug loogu talo galay dadka qaata macaashka naafada iyo macaashka kabidda dhaqaalaha) (Daabacaadda No. 64-030). Waxaa kale oo aad soo booqan kartaa, www.socialsecurity.gov/work.

Barnaamijka Dib Ugu Noqoshada Shaqada

Sida uu dhigayo barnaamijkan, dadka qaata Lambarka Bulshada iyo Macaashka Kabitanka Dakhliga waxaa laga caawiyaa tababarada iyo adeegyada kale ee u baahan yihiin si ay u helan shaqo iyada oo lacag la'aan ah. Dadka naafada ah intooda badan xaq bay u leeyihiin in ay ka qeyb qaataan barnaamijka *Ticket to Work* iyaga oo dooranaya cidda ka caawineysa ee heysata ogolaashaha sharciga ah. Si aad u ogaato barnaamijkaas, waxaa aad ka heli kartaa *Your Ticket To Work* (Daabacaadda No. 05-10061).

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka

caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10029-SO | January 2017
Macaashka naafada
Disability Benefits (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha